# Wargeyska Provider Hub | Abriil 2026

**Fariintan waxa loo soo diray dadka iska diiwaangeliyey Wargeyska Provider Hub.** Haddii qof kuu soo gudbiyey iimaylkan, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad **si toos ah isu qorto**.

---

Ku soo dhawoow Wargeyska Provider Hub, oo ay daabacdo kooxda Provider Hub ee Gobolka Minnesota! Aad baan ugu faraxsanahay inaad nala joogto.

Qoraalkan wargeyska waxaad ka heli doontaa:

- Bixiyeyaasha: Isdiiwaangeli Si Aad Uga Qeybgasho Fursadaha Jawaab-celinta/Cilmi-baarista Naqshadaynta
- Lama Go'aamin Taariikhda Bilaabista Rukhsadaynta ee Family Child Care Intii lagu jiray Kalfadhiga Sharci-dejinta 2026
- Shuruudda Diiwaanka Xaadirinta Elektaroonigga CCAP oo Qaar ka mid ah Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta u Bilaabanaysa 22-ka Juun
- Talooyin ka socda Kooxda Product Success: Dib u sameynta Eraygaaga Sirta, Cusboonaysii Macluumaadka Xiriirka Wakiilka La Oggol yahay
- Ilooyin Cusub iyo Kuwo La Cusboonaysiiyay
- Waxyaabihii Dhawaan La Sii Daayay



*Updated 4/28/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Bixiyeyaasha: Isdiiwaangeli Si Aad Uga Qeybgasho Fursadaha Jawaab-celinta / Cilmi-baarista Naqshadaynta




**Ma tahay bixiye hadda isticmaala ama qorsheynaya inuu isticmaalo Provider Hub? Ma rabtaa inaad la wadaagto waayo-aragnimadaada?** Buuxi foomkan si aad noogu sheegto.

Kooxda Provider Hub waxay si joogto ah u qabataa cilmi-baaris iyo tijaabooyin lala sameeyo bixiyeyaasha (taas oo loo yaqaan "cilmi-baarista naqshadaynta"). Jawaab-celinta aan helno waxaan u isticmaalnaa inaan sii horumarino oo aan u hagaajino qalabka khadka tooska ah.

Cilmi-baarista naqshadaynta gudaheeda, ma jiraan jawaabo khaldan: "Tani ma aha imtixaan adiga lagaa qaadayo, waa imtixaan lagu tijaabinayo Provider Hub."

Marka aad buuxiso **Foomka Xiisaha Fursadaha Jawaab-celinta**, magacaaga iyo macluumaadkaaga xiriirka waxaa lagu dari doonaa liis. Kooxda Provider Hub ayaa markaas ka faa'iidaysan doonta liiskan si ay ula xiriirto bixiyeyaasha marka ay soo baxaan baahiyo cilmi-baaris.

Foomku wuxuu ku weydiinayaa faahfaahin ku saabsan barnaamijkaaga iyo noocyada cilmi-baarista aad xiisayn karto (sahamino, wareysiyo, aqoon-isweydaarsiyo). Tani waxay naga caawinaysaa inaan waafajino fursadaha jawaab-celinta iyo bixiyeyaasha ku habboon.

Waad ku mahadsan tahay inaad bixisay waqtigaaga iyo khibraddaada!

Kor ugu noqo

## Lama Go'aamin Taariikhda Bilaabista Rukhsadaynta Family Child Care Intii lagu jiray Kalfadhiga Sharci-dejinta 2026

Horaantii gu'gan, Gobolka Minnesota wuxuu wadaagay cusboonaysiin ku saabsan jadwalka bilaabista rukhsadaynta daryeelka carruurta ee qoysaska (family child care) ee ku jirta Provider Hub.



*Updated 4/28/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

Go’aan lagama gaari doono goorta la bilaabayo rukhsadaynta family child care ee Provider Hub ka hor dhammaadka kalfadhiga sharci-dejinta ee Minnesota ee 2026.

Ka hor inta aan la bilaabin rukhsadaynta family child care ee Provider Hub, waxaa lagama maarmaan ah in la fahmo isbeddellada ay samayn karto, haddii ay jiraan, sharci-dejintu ee heerarka rukhsadaynta daryeelka carruurta qoysaska. Isbeddel kasta oo dhaca waxay u badan tahay in lagu daro Provider Hub.

Cusboonaysiimo ayaa la bixin doonaa marka kalfadhiga sharci-dejintu dhammaado oo la qiimeeyo saameynta isbeddellada dhici kara.

**Dib u eeg** cusbooneysiinta dhammaystiran ee gu'ga 2026 (PDF) ee 30-ka Maarso iimayl ahaan loogu diray  bixiyeyaasha family child care.

Kor ugu noqo

## Shuruudda Diiwaanka Xaadirinta Elektaroonigga CCAP oo Qaar ka mid ah Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta u Bilaabanaysa 22-ka Juun

Laga bilaabo Juun 22, 2026, Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) **waxay dalban doontaa in qaar ka mid ah bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee hela lacagaha Barnaamijka Caawinta Daryeelka Carruurta (CCAP)** ay soo gudbiyaan diiwaannada xaadirinta elektaroonigga ah iyagoo adeegsanaya qaybta Enrollment & Attendance ee ku jirta Provider Hub.

**DCYF waxay ogeysiisyo boosto ahaan ugu dirtay bixiyeyaasha ay khusayso shuruuddan bishii Maarso 2026.**

DCYF waxay la shaqaynaysaa shirkad adeeg bixiye ah si loo hagaajiyo qaybta Enrollment & Attendance ee hadda jirta gudaha Provider Hub ka hor Juun 22, 2026.

Macluumaad dheeraad ah, ka eeg warsidaha CCAP ee Maarso 18 iyo the bogga EngagementHQ ee ku saabsan shuruudaha cusub ee diiwaanka xaadirinta elektaroonigga ah.

Kor ugu noqo



*Updated 4/28/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Talooyin ka socda Kooxda Product Success: Dib u sameynta Eraygaaga Sirta, Cusboonaysii Macluumaadka Xiriirka Wakiilka La Oggol yahay

Kooxda Guusha qalabyada — oo ah koox khubaro maxalli ah oo kaa caawiya inaad si guul leh u isticmaasho Provider Hub — waxay wadaagayaan laba talo oo ku saleysan wada hadal dhowaan lala yeeshay isticmaaleyaasha:

### Dhibaatooyin makala kulantaa eraygaaga sirta?

Haddii ay kugu adkaato inaad gasho Provider Hub, isku day inaad dib u sameyso eraygaaga sirta. Tilmaamo tallaabo-tallaabo ah ayaa laga heli karaa **Dib u Deji Eraygaaga Sirta ah** si ay kuu caawiyaan.

### Wakiillada La Oggol (Authorized Agent) yahay ee xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh: Ma u baahan tahay inaad cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka?

Si ka duwan isticmaaleyaasha kale, Wakiilka La Oggol (Authorized Agent) yahay ee barnaamijka waa inuu codsadaa isbeddelka macluumaadkiisa xiriirka gudaha ee Provider Hub — ma awoodaan inay iyagu si toos ah u cusboonaysiiyaan.

Sababtoo ah Wakiilka La Oggol (Authorized Agent) yahay waa qofka ah mas'uulka xiriirka lala yeesho ee dhanka hay'adda bixisa shatiga, bixiyaha shatiga ee loo xilsaaray waa inuu dib u eego oo ansixiyaa isbeddel kasta oo lagu sameeyo macluumaadkooda.

Tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan sida loo gudbiyo codsiga noocan ah ka eeg **Codso Cusboonaysiin Macluumaadka Wakiilkaaga La Oggolaaday (xarumaha daryeelka carruurta ee ruqsadda leh)**.

Maqaallo la xiriira:

- **Ma u baahan tahay inaad beddesho qofka ah Wakiilka La Oggol (Authorized Agent) yahay ee barnaamijkaaga?** **Codso Inaad Beddel ku Samayso Wakiilkaaga La Oggolaaday** waxay bixisaa tilmaamo tallaabo-tallaabo ah oo loogu talagalay xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh.
- **Ma tahay Wakiil La Oggol (Authorized Agent) yahay oo ma u baahan tahay inaad cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka?** Ka eeg **Beddel Iimaylkaaga ama Magacaaga (aan ahayn Wakiilka La Oggolaaday**.



*Updated 4/28/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## La xiriir kooxda

Haddii aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan arrimahan ama hawlo kale oo ku jira Provider Hub, wac 651-431-6075 ama **gudbi kiis** marka aad gasho nidaamka. Waxaan ka jawaabnaa kiisaska Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo.

Haddii aan la heli karin qof marka aad wacdo, fadlan ka tag fariin cod ah oo ay ku jiraan inta ugu badan ee macluumaadkan:

- Magaca
- Magaca barnaamijka
- Lambarka taleefanka
- Su'aalaha iyo/ama codsiyada
- Lambarka shatiga ganacsiga (haddii ay suurtagal tahay/khuseyso)

Ma helno macluumaad ka imanaya dadka soo waca haddii aysan ka tagin fariin cod ah. Sidaas darteed, wixii macluumaad ah ee aad fariinta ku darto waxay naga caawinayaan inaan si hufan oo degdeg ah kuugu soo celinno wicitaanka.

## Jawaabaha kooxda

Haddii aad noo reebto farriin ama aad gudbiso kiis onleen ah, waxaan ku dadaaleynaa inaan ka jawaabno 24 saacadood gudahood — tani way isbeddeli kartaa iyadoo ku xiran tirada kiisaska aan helayno.

Waxaan la jaanqaadi doonaa habka aad nala soo xiriirtay marka aan jawaab celin sameyneyno:

**Haddii aad ka tagto fariin cod ah, waxaan kuugu soo wici doonnaa lambarkaas.**



*Updated 4/28/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

**Haddii aad kiis ku gudbiso onleen, waxaan kuugu soo jawaabi doonnaa gudaha Provider Hub (hubi ogeysiisyadaada).**







[Kor ugu noqo](#)

## Ilooyin Cusub iyo Kuwo La Cusboonaysiiyay

### Maqaallo ku saabsan aasaaska Provider Hub oo ku qoran Soomaali, Isbaanish iyo Hmong ayaa hadda la heli karaa

Maqaalladani waxay kaa caawinayaan inaad dhammaystirto hawlaha aasaasiga ah ee Provider Hub — sida gelitaanka, dib u dejinta erayga sirta, daawashada shatiyada/shahaadooyinka jira, iyo helitaanka caawimaad ku saabsan qalabka khadka tooska ah.

- **Soomaali:** Maktabadda Barashada Aasaaska
- **English:** Basics Learning Library
- **español:** Aspectos básicos en Learning Library
- **Hmoob:** Qhov Chaw Teev Cov Kev Pab Ua Ke



*Updated 4/28/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Maqaallo ku saabsan codsiga rukhsadda ku-meelgaarka ah ee EIDBI oo ku qoran Soomaali, Isbaanish iyo Hmong ayaa hadda la heli karaa

Maqaallo ku saabsan codsiga rukhsadda ku-meelgaarka ah ee EIDBI hadda waxaa lagu heli karaa afar luqadood: Soomaali (Somali), español (Isbaanish), Hmoob (Hmong) iyo English (Ingiriisi).

Maqaalladani waxay hagayaan wakaaladaha EIDBI tallaabo kasta oo ka mid ah codsiga gudaha Provider Hub. Waxaa lagu ururiyay EIDBI Licensing Learning Library:

- **Soomaali:** EIDBI Maktabadda Barashada Ruqsadeynta
- **English:** EIDBI Licensing Learning Library
- **español:** Colección de recursos sobre licencias en el Provider Hub para agencias de EIDBI
- **Hmoob:** EIDBI Qhov Chaw Sau Ua Ke Cov Kev Pab Rau Daim Ntawv Tso Cai

## Halka laga heli karo

Dhammaan maqaaladan waxaad ka heli kartaa ee bogga **Provider Hub** webpage qaybta Resources (looma baahna gelitaan):






*Updated 4/28/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

Ama waxaad ka heli kartaa adigoo ka raadinaya qaybta **Help & Resources** marka aad gasho Provider Hub:




[Kor ugu noqo]

## Waxyaabihii Dhawaan La Sii Daayay

Horumarrada lagu sameeyay Provider Hub labadii bilood ee la soo dhaafay waxaa ka mid ah:

- Xadka qoraalka ayaa la kordhiyay, waxaana lagu daray in qoraalku isku laabmo (text wrapping) qaybta Description ee foomka lagu gudbiyo kiisaska Kooxda Guusha Qalabka, si isticmaaleyaashu ugu dari karaan macluumaad dheeraad ah oo ay si buuxda u arkaan qoraalka ay geliyeen
- Waxaa la sameeyay cusboonaysiin ah in marka bixiye shati leh oo Minnesota ah uu gudbiyo diiwaangelintiisa Child Care Assistance Program (CCAP), uusan mar dambe ku arki doonin shatiga qaybta Eligible Licenses ee bogga CCAP — bixiyeyaashu waxay cusboonaysiin karaan macluumaadkooda iyagoo dooranaya xiriirka CCAP ee ku jira qaybaha Pending, Approved iyo Closed/Denied tabs

Faahfaahin dheeraad ah ka eeg sii-deynta ee Febraayo iyo Maarso si aad u aragto cusboonaysiintan iyo kuwo kale.

[Kor ugu noqo]



*Updated 4/28/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*

*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Ku Saabsan Provider Hub

Provider Hub waa qalab khadka tooska ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha adeegyada bulshada si ay ugu codsadaan una maareeyaan shatiyada/shahaadooyinka, fursadaha maalgelinta, iyo barnaamijyada kale ee dowladeed ee la heli karo.

Waxaan sii wadnaa hagaajinta qalabka khadka tooska ah iyo dhisidda astaamo cusub. Inta aan sidaas sameyneyno, bixiyeyaal badan ayaa heli doona gelitaan. Ka eeg bogga **[Provider Hub]** faahfaahin ku saabsan helitaanka hadda jira.

**Kor ugu noqo**

## Ku Saabsan Wargeyska Provider Hub

Wargeyskani wuxuu wadaagaa macluumaad guud oo ku saabsan Provider Hub, waxaana loogu talagalay isticmaaleyaasha hadda iyo kuwa mustaqbalka ee qalabka khadka tooska ah, iyo sidoo kale dadka kale ee xiiseynaya. Waxaan dirnaa wargeys cusub oo Provider Hub ah qiyaastii labadii biloodba mar. Nuqulladii hore waxaad ka heli kartaa bogga **Provider Hub**.

Wargeyskani ma beddelayo macluumaadka si toos ah loogu diro kooxo gaar ah — sida ogeysiisyada loogu talagalay isticmaaleyaasha hadda ee Provider Hub ama macluumaadka soo-gelinta (onboarding) ee isticmaaleyaasha mustaqbalka. Kuwaas si gaar ah ayaa loo diraa.

### La wadaag wargeyskan dad kale

Ma taqaan dad kale oo laga yaabo inay xiisaynayaan helitaanka wararka ku saabsan Provider Hub? U sii iimaylkan kuna dhiirigeli inay **si toos ah isu diiwaangeliyaan wargeyska**.

**Kor ugu noqo**



*Updated 4/28/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*